

# Korona Virus iyo Cudurada raaga

## Talaabo dheeriya oo lagaga hortagayo

Dadka waayeelka ah ee la nool dhiig kar, macaan, iyo cudurada kale ee raaga ayaa si gaar ah ugu nugul caabuqa Corono Virus. Dhamaanteen waxaan ku leenahay door muhiima sidii aan u joojin lahayn faafista caabuqan si aan u bad baadino bulshadeena.

## XIRFADLAYAASHA CAAFIMAAD TALAABOYINKA LA GUDBOON



- ✓ Xaruntaada caafimaad, isticmaal talaaboyinka taxadarka ah sida qalabka nadiifinta markastood bukaan la macaamilayso
- ✓ Horay u ogoow qofka la xanuunsanaya ama lagu arko calaamadaha durayga. Ka dheeree bukaanada kalena.
- ✓ ka warhay bukaanada qaba cudurada Macaanka, Dhiig-karka, iyo cudurada kale ee aan faafin adigoo u diraya Tilifoon, Fariin-gaaban si aad ula socotid daryeelkooda

- ✓ goobaha uu ka dilaacay caabuqa Corono Virus, ku dhiiri gali bukaanada in aysan soo booqan xarunta caafimaadka markasta ilaa oo ay daruuri noqoto maahee
- ✓ Bukaanka lagu arko calaamadaha hargabka ama kuwa neef mareenka, u sheeg taxadarka iyo ka hortaga isku gudbinta caabuqa Coronavirus
- ✓ Bukaanka kuu yimaada iyadoo xaaladiisu daggantahay, u qor daawada mudada ugu dheer ilaa 90 maalmood



- ✓ ka samee Farmasii ku meel gaadh ah bulshada dhaxdeeda, farmasiigaas oo ka dheer xarunta caafimaadka si ay bukaanada la nool cudurada raaga ay dawadooda uga qaataan

\*[https://www.who.int/publications-detail/infection-prevention-and-control-during-health-care-when-novel-coronavirus-\(ncov\)-infection-is-suspected-20200125](https://www.who.int/publications-detail/infection-prevention-and-control-during-health-care-when-novel-coronavirus-(ncov)-infection-is-suspected-20200125)

Haayada Resolve to Save Lives waxa ay ka shaqaysaa sidii ay malaayiin dad uga bad baadin lahayd xanuunada wadnaha iyo xididada, iyo xanuun dilaaca. wixii faah-faahin dheeraad ah kala xidhiidh ama booqo [www.resolvetosavelives.org](http://www.resolvetosavelives.org) amd [www.preventepidemics.org](http://www.preventepidemics.org)

**RESOLVE**  
**TO SAVE LIVES**  
AN INITIATIVE OF VITAL STRATEGIES